



Executive Office

Date: 22 / 02 / 2013

Ref. No.: X.G.G.F/004/2013

مكتب رئيس المجلس التنفيذي

التاريخ: 11 / ربيع ثانی / 1434 هـ

الرقم: م. ر. م. ت / 004 / 2013 م

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

BAAQII 3-AAD**Al-Shabaab aynu Meel uga soo wada Jeesanno**

Ugu horayn waxaan u mahadcelinaynaa illaahii inoo fududeeyey qayb ka mid ah wax ka qabadka Dilkii Sheekh Cabdulqaadir, Nuur Faarax, oo Kooxda Al-shabaab ku dishay Masaajidka Badar ee magaalada Garoowe, isagoo salaada casar ku jira 15/02/2013. Kadibna waxaan uga mahadcelinaynaa Dowlada Puntland howl galada iyo baaritaanada ay ka wado dilkii sheikh, sidoo kale waxaan mahad usoo jeedinaynaa Dowlada Somaliland oo gacanta ku dhigtay qayb ka mid ah gacan ku dhiiglayaasha kadib markii ay dhinacaas u baxsadeen. Sidoo kale waxaan uga mahadcelinaynaa dhammaan shacabka Soomaaliyeed siday uga dhiidhiyeen, dilkii Sheikha, gaar ahaan Culimmada Soomaaliyeed.

- 1- Waxaan ka codsanaynaa dhammaan Culimmada iyo ducaadda Soomaaliyeed inay joogteeyaan siina laban laabaan, wacyigalinta shacabka iyo cadaynta marin habowga kooxda Al-Shabaab, iyadoo la adeegsanayo Nadwooyin, muxaadarooyin iyo khudbooyinka jimcaha, isla markaasna dal iyo dibadba la isu kaashado sidii looga hortagi lahaa dabargoynta ay kooxda Shabaab ku hayso ma dhaafaanka Soomaaliyeed, kooxdaas oo ah cadowga dalka, dadka iyo diinta.
- 2- Waxaan kaloo ka codsanaynaa imaayada Soomaaliyeed dal iyo dibadba inay billaabaan Qunuud, lagu habaarayo kooxdaan dhunsan ee Al-Shabaab, looguna ducaynayo Muslimiinta in illaahay shartooda ka dul qaado, intii ay galaafteena u naxariisto, arintana waa arin diinta boos ku leh, oo Nabiga (scw) ayaa horay usameeyey kadib markii la laayey quraa dadka quraanka baraysay, sidoo kalena u duceeyey muslimiin lacadaadinayey.

المقر الرئيسي: Garowe – Somalia

التلفون: +252-584-3311

نقطة: +252-907-99987

Web: www.ictisam.comEmail: madaxafulinta@ictisam.com

- 3- Waxaan ugu yeeraynaa dhammaan ummada soomaaliyeed in sameeyaan isu soo baxyo waa wayn oo looga hadlayo sidii loo xalin lahaa Mushkiladan wayn ee Kooxda Al-Shabaab ku hayso Shacabka Soomaaliyeed.
- 4- Waxaan ka codsanaynaa dhamaan shacabka Soomaaliyeed meelay joogaanba , inay usoo gudbiyaan laamaha amniga cidkasta oo ay ku ogaadaan inay ku lug leedahay dilkii sheikha ama ay khatar ku tahay nabadgalyada ummadda.
- 5- Ugu danbayntii waxaan ugu baaqaynaa dhammaan shacabka Soomaaliyeed inay si buuxada uga qaybqaataan ololaha looga hortagayo, xasuuqa iyo dabar go'ynta kooxda Al-Shabaab ku hayso dadkeena, qofwalbana waxaa laga doonayaa inuu ololahaas kaga qaybgalo cilmigiisa,caqligiisa,khibradiisa, xoogiisa,xoolihiisa iyo sumcadiisa.

Golaha Fulinta ee Jamaacada Al- Ictizaam Bilkitaab Wassunah



Sheekh Axmed C/samad C/llaahi
Gudoomiyaha Golaha Fulinta